# WARSIDAHA AGA

## AGA NEWSLETTER

WAA WARSIDE-XILLIYEED KU HADLA CODKA
AKADEEMIYE-GOBOLEEDKA AFSOOMAALIGA (AGA)
*A PERIODICAL NEWSLETTER PUBLISHED BY THE INTERGOVERNMENTAL ACADEMY OF SOMALI LANGUAGE*

**TIRSIGA 5AAD, SANNADKA 2AAD, JANAAYO– MAARSO 2019**

**HADAFKAYAGU WAA HIILKA AFKA HOOYO IYO HAL-ABUURKIISA**

## Tusmada Tirsigan

**EREYGA TIFAFTIRKA**

AGA iyo Xuska Maalinta Caalamiga ah ee Afka Hooyo 2019……………………....Bogga 2aad

**QORMOOYIN HORTABIN MUDAN**

Suugaanta Qiimeheeda iyo Qaybaheeda…….Bogga 3aad
Silsiladaha Maansooyinka Tisqaaday Qarnigii Labaatanaad…………………………..Bogga 5aad

**WARARKA WAXQABADKA AGA**

Xuska Maalinta Caalamiga ah ee Afka Hooyo oo lagu Daahfuray Muqdisho……………………..Bogga 6aad
Geeska Afrika oo laga Xusay Maalinta Caalamiga ah ee Afka Hooyo………………………………...Bogga 7aad
Xuska Maalinta Afka Hooyo iyo Soomaalida Qurba-ha……………………………………..Bogga 8aad
Dhallinyaro Tababbar Dhamaystay oo Shahaadooyin la Guddoonsiiyay…………………………..Bogga 9aad
Kulan-aqooneed u Qabatay Ardayda Jaamacadda Kismaayo…………………………………..Bogga 10aad

**WARAR KALE OO XUSID MUDAN**

Guddoomiyaha Aqalka Sare oo Bogaadiyay Dadaalka AGA………………………………………...Bogga 11aad
Wasiirka Warfaafinta oo AGA ku Ammaanay Kaal-inteeda u Hiillinta Afka Hooyo……………..Bogga 11aad
Akadeemiye-Goboleedka oo la Guddoonsiiyay Shahaado Sharaf ……………………………..Bogga 12aad
Masuul ka Tirsan Xarunta Dhaqanka Aw Jaamac oo soo Booqday AGA ……………………………..Bogga 12aad

**KORORSO AQOONTA AFKAAGA IYO HAL-ABUURKIISA**

Qoridda Magaca Soomaali oo uu ka Horreeyo Af 13aad
Allow sahal ammuuraha!! *(Sheeko Gaaban)..Bogga* 14aad

***MURTIDA TIRSIGAN***

Ilaasho Afkaaga Hooyo (Hees)…………..Bogga 15aad

**GOOSANKA TIFAFTIRKA**

**Tifaftiraha Sare**
Mustafa C.Fayruus

**Agaasimaha**
Axmed M.Dhicisow

**Agaasimaha Farsamada**
Axmed Faarax Saalax

**Kaaliyaha Farsamada**
Amiin Yuusuf Khasaaro

**Bahda tifaftirka**
Cabdullaahi Shiiqaalow
Cabdiraxmaan Abtidoon
Cabdullaahi sh. Cabdi
Saynab Xaaji Axmed

**Kala xiriir : info@aga.so**
**Facebook: @Akadeemiye Go-boleedka AfSoomaaliga**
**Twitter:@somaliacademy**
**Website :www.aga.so**

## WARSIDAHA AGA

***Ku soo dhowaada tirsiga 5aad ee warsidaha AGA!***

Warsidaha AGA waa warside-xilliyeed ay soo saarto Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaligu (AGA), oo idiin soo gudbiya aqoon isugu jirta xog-wadaag, aqoon-wadaag iyo talo-wadaag.

Warsidahan ujeeddooyinka loo aasaasay waxaa ka mid ah in uu ehelada afka, hal`abuurka, dhaqanka, qoraalka iyo aqoon-faafinta ee daafaha dunida kala jooga la socodsiiyo hawlaha muhiimka ah ee ku saabsan arrimaha kor ku xusan

Warsiduhu wuxuu ururiyaa, kaydiyaana dhacdooyinka muhiimka ah iyo waxqabadka arrimaha kore. Wixii ah fikrado iyo talobixin ku saabsan sii hagaajinta, hannaaninta iyo horumarinta warsidahan aad ayaan u soo dhoweynaynaa.

Sidoo kale, gacmo furan ayaan ku soo dhowaynaynaa qoraallada ay soo gudbiyaan qalinleyda iyo ehelada Af-Soomaaligu.

*Warsidahani wuxuu ku soo baxaa nuqul daabacan iyo mid elektoroonig ah* (eeg **www.aga.so**).
*Cinwaanka lagala soo xiriirayaa waa Email: info@aga.so*




***'Maalinta Caalamiga ah ee Afka Hooyo'***

# ERAYGA TIFAFTIRKA

## AGA iyo Xuska Maalinta Caalamiga ah ee Afka Hooyo 2019

## *'Afka hooyo waa furaha horumarinta iyo heshiisiinta bulshada'*

Tirsigani waa kii shanaad ee Warsidaha AGA, wuxuu diiradda saarayaa barnaamijyadii *'Toddobaadka Afka Hooyo'* ee Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaligu ku xustay *'Maalinta Caalamiga ah ee Afka Hooyo'*, oo ku beegnayd maalinta 21/2/2019.

Barnaamijyadan waxay socdeen shan maalmood 20-24/2/2019, sidaas darteed, ayaan ugu magacawnay '*Toddobaadka Afka Hooyo';* waxayna ka kala dhaceen magaalooyinka waaweyn ee Geeska Afrika iyo dalalka ay ku badan yihiin jaaliyadaha Soomaaliyeed ee qurbaha deggan, waxayna ka koobnaayeen xaflado iyo kulan-aqooneedyo barbar socday oo ay tebinayeen qalabka warbaahintu.

Qabanqaabada hawshan, Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga (AGA) waxay la kaashatay hay`adaha iyo ururrada ay bahwadaagta yihiin; waxaana ka soo qaybgalay masuuliinta, waxgaradka bulshada iyo ehelada afka iyo aqoonta, iyo guud ahaanba bulshaweynta Soomaaliyeed.

Sidii sannadihii hore, xafladahani waxay ka dhaceen dhowr iyo toban magaalo oo ku kala yaal Afrika, Yurub iyo Waqooyiga Ameerika; oo ay ka mid yihiin Muqdisho, Kismaayo, Baydhabo, Hargeysa, Garoowe, Jigjiga, ikk; iyo intaa ku dhow oo ku baahsan Yurub iyo Waqooyiga Ameerika, sida London (UK), Oslo (Norway), Helsinki (Finland), Minneapolis (USA) iyo Edmonton (Canada).

*'Toddobaadka Afka Hooyo'* waxaa lagu daahfuray xaflad ballaaran oo lagu qabtay Muqdisho 20/2/2019, waxaana lagu soo gabagabeeyay xaflad si wacan loo soo agaasimay oo 24/2/2019 lagu qabatay magaalada *Edmonton, Alberta* ee dalka Kanada (Canada).

Xafladahan waxaa barbarsocday kulan-aqooneedyo iyo dood-cilmiyeedyo ay ka qaybgalayeen aqoonyahanno iyo xeeldheerayaal afeed oo ka tirsan AGA, ayna tebinayeen qalabka warbaahintu, gaar ahaan telefishannada, idaacadaha iyo baraha bulshada.

Tirsigan Warsidaha AGA wuxuu xambaarsan yahay warbixinno lagaga xog-warramayo madal kasta sidii wax u dhaceen.

Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaligu waxay sannadkan u doortay in halkudhegga maalinta caalamiga ah ee afka hooyo uu noqdo

*'Afka hooyo waa furaha horumarinta iyo heshiisiinta bulshada'*. Waa halkudheg la jaanqaadaya halkudhegga sannadkan ee hay`adda UNESCO ay dooratay oo ah *'Indigenous languages matter for development, peace building and reconciliation'* iyo waayaha Soomaalidu xilligan marayso intaba. Dhammaan laamaha AGA ee daafaha dunida xafladihii ay qabanqaabiyeen waxay si midaysan astaan uga wada dhigteen halkudheggan micnaha weyn xambaarsan.

Wada xiriirka ka sokow, afku waa aalad kaalin mug leh ka qaadata horumarinta, is-afgaradka, wada noolaanshaha iyo wadajirka bulsho kasta; waana taas dulucda iyo farriinta uu daaran yahay halkudheggani.

Baraha bulshadu si kaalin muuqata ay uga qaataan damaashaadka, waxaa loo sameeyay ***haashtaag*** ah ***#UHiilliAfkaagaHooyo***. Waa halkudhegga hanaqaaday ee AGA sida joogtada ah u adeegsato.

Damaashaadka munaasabaddani wuxuu ka mid yahay hawlaha ay AGA ku dhaqangalinayso halqabsigeeda ah '***Hadafkayagu waa Hiilka Afka Hooyo iyo Hal-abuurkiisa'***.

Tirsigani waxa kale oo uu xambaarsan yahay qoraal cilmiyeedyo ka hadlaya suugaanta iyo qaybaheeda, iyo silsilad maanseedyada tisqaaday. Sidoo kale, wuxuu soo tebinayaa bogaadin loo soo jeediyay AGA iyo kaalinteeda muuqata ee u hiillinta afka hooyo.

Waxaa Iyana xusid mudan in Warsidaha AGA aan ku soo kordhinay qaybta *'hal`abuurka'* oo kutalagalku yahay inay joogto ahaato, laguna soo gudbinayo curinta iyo hal`abuurka suugaanyahannada Soomaaliyeed, tix iyo tiraab labadaba. Sidaas darteed, tirsigan waxaa innoogu jira sheeko gaaban *'Allow sahal ammuuraha'* iyo heesta *'Ilaasho afkaaga hooyo'*.

*Akhris wacan!*

# QORMOOYIN HORTABIN MUDAN

## Suugaanta Qiimeheeda iyo Qaybaheeda

Qore: Dr Maxamed Daahir Afrax

**Waa maxay suugaan?**

Af-Soomaaliga 'suugaan' waxaa loo bixiyey waxa afka Ingiriiska loo yaqaan *'literature'* afka Carabigana *'adab'*.Hormuudka qaamuusyada Af Ingiriisiga, sida kuwa Oxford iyo Cambridge, 'literature' marka la soo koobo waxay ku micneeyaan inuu yahay qoraal leh qiime sare oo fan ahaaneed awoodna u leh inuu waaro.Qeexiddaas guud ka sokow, afafka dunida sida badan fasiraado kala duwan ayaa la siiyaa waxa loola jeedo 'suugaan'.

Dhaqanka Soomaalida, suugaan waxaa lagu tilmaami karaa hadal loo dhisay si hal-abuurnimo ah oo ay ku dheehantahay qurux fannimo, hadalkaas oo noqon kara mid lagu tabiyey dhigid ama dhihid. Waa labada hab ee loo kala adeegsado tabinta hadalka.Waxaa kaloo lagu magacaabi karaa qawl iyo qoraal.

Qaamuuska af Soomaaliga ee uu qoray Yaasiin Cismaan Yuusuf, suugaan wuxuu ku micneeyey 'wax kasta oo la qoro ama lagu hadlo oo ulajeeddadooda loo jeelo ama loo bogo amase si kale loo jeclaysto'.

Suugaantu waa fan. Waa fanka erayga. Noocyada kale ee fanka waxaa ka mid ah fanka maqalka, sida muusigga iyo cod-qurxinta; fanka muuqaalka, sida sawirka iyo farshaxanka; iyo fanka dhaqdhaqaaqa, sida jilidda iyo ciyaaraha.

**Fan waa maxay?**

Waa fikrad ama dareen lagu muujiyey sawir qurux badan. Marka laga cabbir-qaato halbeeggaas guud, suugaantu waa fikrad ama dareen lagu sawiray erayada afka oo loo adeegsaday si qurux badan oo ka duwan hadalka caadiga ah. Waxaa la yiraahdaa hadduu hadalku caano noqon lahaa suugaantu labeen bay noqon lahayd. Micnaha, suugaantu waa labeenta hadalka.

Hadalku wuxuu suugaan ku sifoobaa marka lagu qurxiyo afshaxan ay hibo u leeyihiin dad gaar ah. Afshaxankaas ama farsamooyinkaas waxaa ka mid ah hab-dhac miisaaman, xaraf-raac taxan iyo hummaag-abuur lagu hor keenayo sawirro lagu xardhay erayada afka.

Erayga 'suugaan' ma aha eray cusub. Waa soojireen.Wuxuu lahaan jirey dhawr micne oo kala duwan, kuwaas oo dhammaantood ku biyashubanaya duxda ugu qurxoon ama ugu qiima sarraysa waxa markaas laga hadlayo. Hidde ahaan micnaha ugu caansan ee uu eraygani lahaan jirey wuxuu ahaa ugbaadka qurxoon ama cawska yaryar ee soo magoola marka roobku da'o. Waxaa la isku war galin jirey: 'sahankii wuxuu soo sheegay meel suugaan leh'.Micne labaad oo aan kaas ka dheerayn, suugaan waxaa la oran jirey doogga isugu hara meesha biyuhu isugu shubmaan ee xilliga jiilaalka marka dhulka kale qallalo weli rayska iyo qoyaanka leh. Waxaa la odhan jirey 'geelii reer hebel meel hebla' ayuu suugaan ka daaqayaa'. Saxansaxada roobka ayaa iyadana suugaan lagu tilmaami jirey, degaannada Soomaalida qaarkood.

Intaas oo dhan ka sokow hore ayay u jirtey in hadalka qurxoon loo yiqiin suugaan. Keliya eraybixintan dambe waa la sii cilmiyeeyey lana sii qeexay qaybaha ku abtirsada.In hore loo isticmaali jirey meelaha laga arki karo waxaa ka mid ah murtida tiraahda *'suugaani hadal ma aha, hilib sooryo ma aha, doqoni sokeeye ma aha'*. Halkan *'suugaani hadal ma aha'* waxaa loola jeedey hadalka suugaanaysan la mid ma aha hadalka kale ee qof waliba u fahmi karo si fudud.Tusaale kale waxaa ah in eraygan laga dhex helayo maansadii hore ee Soomaalida, meelo ay gabayaagu maansadooda ku tilmaamayeen suugaan.Waxaa ka mid ahaa gabyaagii caanka ahaa Xuseen Xasan, meerisyo uu lahaa: 'Suugaanta gabay maalintaan sadar ka sheegaayo, Weligay ma saranseeriyee waan susubiyaaye'.

**Qiimaha suugaanta**

Ummdaha dunida ummad kasta suugaanteedu waxay u leedahay qiime aad u weyn. Afku waa udub-dhexaadka dhaqanka, suugaantuna waa halbowlaha nolosha afka. Afla'aan dhaqan ma hanaqaadi karo, suugaanla'aanna af ma noolaan karo ama ma kobci karo. Gaar ahaan ummadda Soomaaliyeed suugaantu waxay u leedahay qiime aan la soo koobi karin oo ay uga duwantahay ummado kale oo badan.

Laba arrimood ayaa u sabab ah qiimahaas gaar ahaaneed. Sababta koowaad waa Soomaalida oo wax kasta ku cabbirta kuna diiwaan-galisa suugaan, siiba maanso, ahna ummad hal-abuurka suugaanta u leh hibo aan caadi ahayn oo dunidu u wada qirsantahay, kuna qiimayso. Sababta labaadna waa suugaanta oo hidde ahaan Soomaalida u gasha kaalinta qalabka war-is-gaarsiinta iyo kaydka qoran oo aynaan ka hayn dhaxal laga tilmaan-qaato. Si kooban, qiimaha iyo waxtarka ay suugaantu Soomaalida u leedahay waxaa lagu tilmaansan karaa qodobbada soo socda:

- Waa halbowlaha nolosha iyo hodontinimada Af-Soomaaliga.

- Soomaaliyeed u isticmaalaan ka talinta samaha iyo ka digidda xumaha.
- Waa muraayadda ay bulshadu iska dhex arag-to dunida dibadduna ka daawato kuna qaddar-iso.

**Qaybaha suugaanta**

Suugaanta marka la darsayo waxaa loo kala soocaa laba qaybood oo kala tilmaan duwan: suugaantii hiddaha iyo suugaanta casriga ah, ama suugaan-hiddeed iyo suugaan-casri. Tan hore waa suugaantii soo jireenka ahayd ee facba fac ka soo dhaxlayey. Tan labaadna waa jaad-suugaaneedyada cusub ee soo baxay xilliyadan hab-nololeedka casriga ah ee magaalaysan, lana jaan-qaadaya waxa ka socda dunida kale. Jaad-suugaaneedyada ku abtirsada suugaan-hiddeedda waxaa ugu caansan murtida, maahmaahda, maansadii hore, hees-hawleedda, hees-cayaareedda iyo sheeko-hiddeedda oo ay ku jirto sheeko-carruureeddu, ama waxa dadka qaar ku magacaabaan sheeka-xariiro. Dhanka kale, suugaan-casrida waxaa ku abtirsada riwaayadaha, sheeko-qorista, maansada cusub, iyo hees-casrida.

Si loo wada fahmo waxa ay kala yihiin, aan tilmaa-mo kooban ka bixinno suugaan-hiddeedda iyo suugaan-casrida,.

**Suugaan-hiddeed**

Waxaa ka mid ah tilmaamaha u gaarka ah:
- Waa soo jireen
- Waqtigii ay soo baxday lama yaqaan
- Cid alliftay lama yaqaan
- Bulshadu way ka wada qayb-qaadataa
- Waxay u badantahay maaweelo fudud oo murti xambaarsan

*Jaadadka ku abtirsada waxaa ka mid ah:*

◊ Sheeko-hiddeed oraah lagu tabiyo
◊ Maanso-hiddeed af lagu tabiyo
◊ Hees-hiddeed ay isku maaweeliyaan dadka qaadayaa.
◊ Murti iyo maahmaah

**Suugaan-casri**

*Waxaa ka mid ah tilmaamaha u gaarka ah:*
- Waxay la timi nolosha casriga
- Waqtigii la curiyey waa la ogyahay
- Mu'allifkeeda waa la yaqaan
- Waxay leedahay xirfadley u gaar ah oo bulshada u tabisa
- Waxaa ku badan murti culus oo maaweelo lagu qurxiyey

*Jaadadka ku abtirsada waxaa ka mid ah:*

- Sheeko-casri qoraal ah (qiso & sheeko gaaban)
- Maanso-casri badiyaaba la qoro ama lagu ta-biyo qalabka warbaahinta.
- Hees-casri dadweyne loogu talagalo loona adeegsado qalab teknoolojiyadeed
- Riwaayad

***Jaad-suugaaneedyada Soomaalida***

Sida loo badan yahay Soomaaliga caadiga ah suugaan wuxuu u yaqaan gabayada iyo heesaha keliya. Kuwaasi waa laba qura oo ka mid ah jaadad badan ama noocyo kala duwan oo ay ka koobanto suugaantu. Noocyadaas ama jaadad-kaasi guud ahaan waxay kala hoos tagaan laba rukun oo waaweyn, kuwaas oo lagu tilmaami ka-ro labada lugood ee ay ku taagantahay suugaantu.Waxaa lagu magacaabaa *tix* iyo *tiraab*.Tixdu waa hadal taxan, ku socda xaraf-raac higaadsan iyo habdhac miisaaman oo isu dheelli-tiran. Waxay raacdaa xeerar soo-jireen ah oo aan laga weecankarin, sida aan dib ka sharxi doonno. Tiraabtuna waa hadal asna leh qurux fannimo oo loo adeegsadey farsamooyin ka du-wan kuwa tixda.

**Gunaanad**

Suugaantu cilmi ahaan waa laan aqooneed aad u baaxad weyn, lehna faracyo badan oo aan qaar-kood weli meel la isla dhigin. Sidaa awgeed, ma aha wax looga wada bogan karo qoraal kooban oo loogu talagalay inuu bixiyo sawir guud. Waxaanse rajaynaynaa sawirka guud ee aan qoraalkan ku soo bandhignay inuu waxtar weyn u yeelan doono dadka suugaanta jecel ee wax ku akhriya afka Soomaaliga. Dad badan ayaa da-daalay oo faafiyey qoraallo ku saabsan suugaan-ta Soomaalida. Haseyeeshe, dadaalladaasi waxay u badan yihiin laba midkood. Ururin suugaan loo baahnaa in la kaydiyo iyo darsid qaar ka mid ah jaad-suugaaneedyada Soomaali-da, taas oo badi xoogga la saaray darsidda maansada. Hase yeeshe, waxay nuqsaan weyni ka jirtaa dadaal si cilmi ah loo darso guud ahaan suugaanta Soomaaliyeed waxa ay tahay iyo qay-baha ay ka kooban tahay. Waxaan rajaynaynaa mustaqbalka soo socda in baahidaas la daboolo.

**Qoraallada la tixraacay**


Andrzejewski, B. W., Pitaszewicz and Tyloch, W., "Editors' Introduction" in Andrzejewski, Pitaszewicz and Tyloch (eds.), *Literatures in African Languages: Theoretical Issues and Sample Surveys,* Cambridge:

Axmed Cali Abokor, *Somali Pastoral Worksongs: the Poet-ic Voice of the Politically Powerless,* Uppsala: Uppsala University, 1993.

Maxamed Daahir Afrax, "Classification and Numenclature of Somali Literary Forms: A Pending Issue", Horn of Africa Jour-nal, XXIII, 2005, pp. 58 – 84.

Maxamed Daahir Afrax, *Fan-masraxeedka Soomaali-da:Raadraac Taariikheed iyo Faaqidaad Riwaayado caanbaxay,* Djibouti: Centre National de la Promotions Cul-turelle et Artistique, 1987.

Orwin, M., "On the Concept of 'Definitive text' in Somali Poet-ry", *Bulletin of SOAS,* **66,** 3 (2003), 334-347.

Yaasiin Cismaan Keenadiid, *Qaamuuska Afsoomaaliga*, Mogadishu: Akadeemiyaha Dhaqanka, 1976.

# Silsiladihii Maansooyinka Tisqaaday Qarnigii Labaatanaad

**Qore: Cabdullaahi Sh. Cabdi 'Gacanka'**

Qormadan waa guudmar aan diiradda ku saarayo silsiladaha maansooyinka ee geyiga Soomaaliyeed ka tisqaaday qarnigii 20aad.

Silsilad maanso waa taxane maanseed isku guntan, kuna soohan ujeeddo qura, oo ay isweydaarsadeen maansayahanno kala duwan, aragti ahaanna is diidan, oo uu midba mid ka dabaqaato.

Mararka qaarkood waxaa dhacda, ismaandhaaf kala galay laba maansayahan inuu sababo inay tixooyin is weydaarsadaan oo aan misana silsilad noqonayn. Waayo, silsilad waxaa noqon kara isu maansood ay ka qaybgalaan dhowr hal`abuur ama ka badan oo socota muddo.

### Silsiladaha tisqaaday qarnigii 20aad

Silsiladihii maanso ee ugu miisaanka weynaa ee soo maray suugaanteenna qarnigii labaatanaad waxaa ugu caansan shan silsiladood oo kala ah:

- Silsiladdii Guba.
- Silsiladdii Halacdheere.
- Silsiladdii Xaydha.
- Silsiladdii Siinley.
- Silsiladdii Deelleey.

Shantan silsiladood waxaa la tiriyay horaantii qarnigii 20aad ilaa dabayaaqadiisii; waxayna kala curteen xilliyo aan isku qaab-nololeed ahayn, silsilad kastaana waxay huwan tahay kana tarjumaysaa hab-nololeedkii sebenka la tiriyay.

Haddaba, aan guudmar kooban ku samayno mid kasta oo ka mid ah shantan silsiladood.

### Silsiladdii Guba

Silsiladdan Guba kutalagal la`aan ayay curatay horaantii qarnigii 20aad, xubin ku jooggeedu waa guubaabo-xifaaleed beeleed isugu soo biyashubanaya digasho iyo garnaqsi; waxaana ka qayb galay 13 gabyaa miisaan culus ku lahaa maansada.

Waa silsiladdii ugu waqtiga dheereyd, sida la weriyay waxay socotay ku dhowaad soddon gu`; waxaa la sheegaa curashadeedii wiil dhashay markii uu soddon jirsaday inuu soo afjaray.

### Silsiladdii Xaydha

Silsiladda Xaydha xubin ku jooggeedu waa xifaalomaag rag dhalya iyo xidid wadaagba ah, kuna arooraysa garnaqsi.

Waxay hillaaddii sannadkii 1941 ka curatay subag la isku qoonsaday oo uu ninna soo gaday nin kalena ku sheegey xaydh. Inkasta oo la rumaysan yahay in tixaheedu badnaayeen, haddana, shan gabay uun baa laga helay.

### Silsiladdii Halacdheere

Silsiladdii Halacdheere xubin ku jooggeedu waa xujo-xifaaleed ka curatay guur dhexmaray laba beelood, dulucdeeduna waxay isugu soo biyashubanaysaa garnaqsi, waxaana ka qeybgalay siddeed gabyaa oo magac weyn ku lahaa hal`abuurka maansada.

Ninka silsiladdani naanaystiisa wadato waa Maxamed Xuseen Canshuur. Sida la sheegey ma aheyn nin cir weyn. Hase ahaatee wuxuu lahaa hamuun gorayo.

### Silsiladdii Siinley

Siinley horaantii 1970aadkii ayay ka curatay Kulliyadda Waxbarashada Lafoole. Siinleey waa silsilad aad u shareeran, xubin ku jooggeeduna waa far ku fiiqidda galdaloolooyinkii siyaasadeed, dhaqan dhaqaale ee sebenkaa jiray; waxaana ka qayb qaatay ugu yaraan 15 maansayahan.

Silsiladdani aad ayay u bishay hodantooyada suugaanta Soomaalida.

### Silsiladdii Deelleey

Silsiladda Deelley waxay curatay Diisambar 1979, xubin ku jooggeedu waa farkufiiqidda dhaliilihii maamul ee markaa ka jiray dalka. Waxay hoosta ka xariiqaysaa dhibaatada qabyaaladdu ku hayso dawladnimada Soomaaliya.

Waa silsiladda ugu hal`abuurada badan, illaa dhowr iyo konton maansayahan ayaa ka qayb qaatay tixooyinkeeda.

### Gabagabo

Silsilad maanseedyadu waxay tiirdhexaad u yihiin gundheerida murtiyeed ee suugaanta Soomaalida. Sida maansooyinka kaleba, waxay xambaarsan yihiin faa'iidooyin ay ka mid yihiin:

1. In ay keydiyeen kumanaan kun oo ereysaleed gundhig u ah af Soomaaliga, la'aantoodana ay lumi kareen.
2. In ay keydiyeen, tahayna il laga tixraaci karo, sooyaalka qaabnololeedkii bulsheed ee sebenkii la tiriyay.

# WARARKA WAXQABADKA AGA

## Muqdisho iyo Xuska Maalinta Caalamiga ah ee Afka Hooyo

Xaflad si heer sare ah loo soo agaasimay, laguna maamuusayay Maalinta Caalamiga ah ee Afka Hooyo, ayay AGA Muqdisho ku qabatay 20/2/2019.

Xafladdan waxay daahfur u ahayd barnaamijyo taxane ah, loogun magacdaray 'toddobaadka afka hooyo, oo lagu maamuusayo maalinta caalamiga ah ee afka hooyo; waxaana soo qabanqaabiyay Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga oo kaashanaysa Golaha Abwaannada Soomaaliyeed.

Xafladdan waxaa ka soo qaybgalay masuuliin, waxgarad, aqoonyahanno, dhallinyaro iyo dadwayne kala duwan. Masuuliinta waxaa horkacayay Wasiirka Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Dalxiiska, Md Daahir Maxamuud Geelle, guddoomiyaha AGA Dr Maxamed Daahir Afrax iyo kusimaha guddoomiyaha Golaha Abwaannada abwaan Xirsi Dhuux Maxamed, xildhibaan Sahra Cumar Maalin, agaasimaha arrimaha bulshada ee xafiiska Ra`iisalwasaaraha marwo Maryan Aadan Amiin; sidoo kale, waxaa joogay madaxda naadiyada akhriska iyo qoraalka iyo marti sharaf kale.

Guddoomiyaha Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga Dr. Maxamed Daahir Afrax, oo khudbad ka soo jeediyay munaasabaddaas ayaa marka hore u mahadceliyey xubnaha Goosan-hawleedka AGA ee dadaalka weyn galiyey qabanqaabinta xafladda; wuxuu kaloo u mahadceliyey TV-yada ay AGA bahwadaagta yihiin, siiba TV-ga Somali Cable iyo mulkiilihiisa, Xuseen Dhuubow, oo gacan hagarla'aaneed ka geystey munaasabadda.yiri: "Xafladda aan maanta ku qabanayno Muqdisho waxay daahfur u tahay xaflado taxane ah oo aan ku magacawnay *Toddobaadka Afka Hooyo*."

Wasiirka Warfaafinta Soomaaliya, Daahir Maxamuud Geelle, oo isna halkaas ka hadlay ayaa sheegay guud ahaan shucuubta caalamka gaar ahaan ummadda Soomaaliyeed inuu ugu hambalyeynayo xuska maalinta afka hooyo, waxaana uu caddeeyay inuu ku faraxsan yahay inuu ka soo qeyb-galo xuska Afka Hooyo.

Munaasabaddaas waxaa kale oo ka hadlay Xildhibaan Sahro Cumar Maalin, Kusimaha Guddoomiyaha Golaha Abwaannada Xirsi Dhuux, Agaasimaha Arimaha Bulshada Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha, Maryan Aadan Amiin, Guddomiyaha Naadiga Hillin-hayaan Cabdiqaadir Jubba iyo masuuliin kale.

Kooxda Hiddo ayaa goobta ku soo bandhigay heeso iyo ciyaardhaqameedyo kala duwan. Heesaha ay qaadeen waxaa ka mid ahaa heesta 'ilaasho afkaaga hooyo', oo ah hees cusub oo munaasabaddan ay ugu talagaleen, iyo heestii caanka ahayd ee 'Alif la kordhabay' oo ay qaaday fannaanad Saynab Samiira.

Sidoo kale, waxay kooxda Hiddo goobta ku soo bandhigeen ciyaaraha hiddaha iyo dhaqanka, gaar ahaan ciyaaraha Wilisaqo iyo Heerimaahee.

Waxaa kale oo xafladda bilay tartan kedis ah oo ka koobnaa su'aalo la xiriira af Soomaaliga oo ka qaybgalayaashu ka qaybgaleen.



# Magaalooyinka Geeska Afrika oo laga Xusay Maalinta Caalamiga ah ee Afka Hooyo

Magaalooyinka Soomaaliyeed ee Geeska Afrika waxaa lagu qabtay xaflado lagu maamuusayay maalinta caalamiga ah ee afka hooyo 21/2/2019, waxaana ka mid ah: Hargaysa, Jigjiga, Garoowe, Baydhabo, Kismaayo iyo Muqdisho. Xafladahan waxaa soo qabanqaabiyay Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga (AGA) oo kaashanaysa ururrada ay bahwadaagta yihiin.

**(Hargeysa):** Xafladdu waxay dhacday 21/2/2019, waxaana soo agaasimay Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga oo kaashanaysa Jaamacadda Golis. Waxaa ka soo qaybgalay aqoonyahanno iyo masuuliin kala duwan, waxgaradkii ka hadlay waxaa ka mid ahaa wakiilka Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaliga ee Hargaysa Md Ismaaciil Aw Aadan (Jaajuumow) iyo Guddoomiye Ku-Xigeenka Jaamacadda Golis Bare Sare Xasan Cabdi.

**(Jigjiga):** Xafladda xuska maalinta caalamiga ah ee afka hooyo, oo ay soo qabanqaabiyeen AGA iyo Jaamacadda Jigjiga, ayaa lagu qabtay magaalada Jigjiga 21/2/2019.

Masuuliinta goobta ka hadlay waxaa ka mid ahaa Wasiirka Dhaqanka iyo Dalxiiska DDS Md Ilyaas Abiib, wakiilka AGA ee Jigjiga Md Maxamuud Macallin, Ku-xigeenka Guddoomiyaha Jaamacadda Jigjiga Ilyaas Cumar, iyo waxgarad kale.

Munaasabaddaas waxaa isna ka hadlay muwaadin u dhashay dalka Kanada oo Soomaalidu u bixiyeen *'Xasan Cadde'*, wuxuuna ku hadlay af Soomaali aad u soo jiitay dadkii munaasabadda ka soo qaybgalay.

**(Garoowe):** Akadeemiye-Goboleedka oo kaashanaysa Jaamacadda PSU ayaa xaflad lagu xusayay maalinta afka hooyo ku qabatay 21/2/2019 magaalada Garoowe.

Masuuliinta goobta ka hadlay waxaa ka mid ah Wakiilka Akadeemiye-Goboleedka ee Garoowe Md Maxamed Sheekh Xasan AfGudhiye, Guddoomiyaha Jaamacadda PSU Dr. Axmed Shire Axmed iyo Drs Luul Maxamed Warsame.

**(Kismaayo):** AGA oo kaashanaysa Madasha Maan-kulan ayaa xaflad lagu xusayay maalinta caalamiga ah ee afka hooyo ku qabtay 21/2/2019 magaalada Kismaayo.

Xafladda waxaa ka soo qayb galay masuuliinta maamulka heer gobol, degmo iyo madaxda Jubbaland iyo dadweyne kale.

Masuuliinta goobta ka hadlay waxaa ka mid ahaa Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Waxbarashada Jubbaland Md Cabdirisaaq Axmed Xandal, Wasiiru-Dowlaha Wasaaradda Dastuurka Jubbaland Md Axmed Sitiin iyo wakiilka AGA ee Jubbaland Md Xasan Maxamuud Qorane

**(Baydhabo):** AGA oo kaashanaysa Jaamacadda Koonfurta Soomaaliya ayaa munaasabad lagu xusayay maalinta afka hooyo ku qabatay 21/2/2019 magaalada Baydhabo.

Masuuliinta goobta ka hadlay waxaa ka mid ahaa wakiilka Akadeemiyada AGA ee Baydhabo Bare Sare Maxamed Cali Kalaay, Gudoomiyaha Ururka SOWEJA Muxyadiin Xusni, Guddoomiyaha Dhallinyarada Gobolka Bay Aadan Shaati iyo xoghayaha ururrada bulshada SOSWENSA Cali Cabdullaahi Cali.



# Xuska Maalinta Caalamiga ah ee Afka Hooyo iyo Laamaha AGA ee Qurbaha

Xaflado lagu maamuusayay maalinta caalamiga ah ee afka hooyo *'MCAH'* ayaa ka dhacay Yurub iyo Waqooyiga Maraykanka, waxaana soo agaasimay laamaha AGA ee qurbaha oo kaashanaya bahwadaagtooda kale. magaalooyinka lagu qabtay waxaa ka mid ah:

**(London)**; Xaflad lagu maamuusayay MCAH ayay AGA-UK ku qabatay 23/2/2019 xarunta Dhaqdhaqaaqa Qabyaalad la-Dirirka *(ATM)* ee London; waxaana ka hadlay waxgarad ay ka mid yihiin Saynab Aadan Sharci, Aamina Muuse Weheliye, Faaduma Shaxshaxleey, Ibraahim, iyo Fowsiyo; waxayna ka hadleen xaaladda af Soomaaliga, gaar ahaan da`yarta qurbaha iyo sidii wax looga qaban lahaa. Waxaa iyana xafladdan ka qaybgalay ergo ka socotay Jaaliyadda Soomaaliyeed ee Bristol, UK.

Ugu dambayn, Bare Sare Cabdiqaadir Ruumi oo hagayay barnaamijku wuxuu bulshada ku boorriyay in la iska kaashado daryeelka afka hooyo.

**(Oslo);** Xafladda MCAH ayaa 23/2/2019 lagu qabtay maktabadda *Toyen* ee magaalada Oslo (Norway); waxaana ka soo qayb galay dadweyne u badnaa waalidiin iyo carruur. Waxaa aad looga hadlay baridda iyo ku abaabinta jiilka soo koraya afka iyo dhaqanka.

**(Helsinki)**; Xafladda MCAH waxaa 23/2/2019 lagu qabtay maktabad ku taalla Helsinki, Finland; waxaana lagu soo bandhigay buugaag kala geddisan, waxaana dood la isku weydaarsaday kor u qaadidda dhaqanka akhriska.

**(Minneapolis):** Xafladda MCAH ayaa 22/2/2019 lagu qabtay Minneapolis, USA; waxaana soo wada qabanqaabiyay AGA iyo Meertada Afka Hooyo iyo Suugaantiisa ee Minnesota (USA).

Munaasabddaas waxaa ka hadlay masuuliin iyo waxgarad ay ka mid yihiin wakiilka AGA ee Kanada Md C/risaaq Ismaaciil (Cirro), oday Cawil, Bashir Xaaji Cali (Jamaal), maama Sahra Xaashi iyo Md Cabdi Guuleed; waxayna halkaas ka soo jeediyeen khudbado ay isku boorriyeen sidii loogu dadaali lahaa baridda af Soomaaliga ee ubadkooda.

Waxaa goobta ka hadlay masuuliin iyo waxgarad ay ka mid yihiin Macallin Siciid Saalax Axmed oo ah wakiilka AGA Waqooyiga Maraykanka, Injineer Maxamuud Cabdikariin Sulaymaan, Sh Xasan Xade, Xasan Huruusa, Cusmaan Cali, Maxamed Axmed Caarre "Macallin Kayd". Waxaa xafladda bilay googoos ay ay soo bandhigeen ardayda Jaamacadda Minnesota.

**(Edmonton):** Magaalada Edmonton (Alberta, Canada) waxaa si weyn looga xusay MCAH 24/2/2019, waxaana soo qabanqaabiyay laanta AGA, Canada.




## Qalabka Warbaahinta iyo Toddobaadka Afka Hooyo

Xafladaha lagu maamuusayay MCAH waxaa barbarsocday kulan-aqooneedyo lagu falanqaynayay xaaladda af Soomaaliga ee xilligan iyo sida loo tayayn lahaa adeegsigiisa, waxaana soo qabanqaabiyay guud ahaan laamaha AGA, siiba waaxda warbaahinta. Kulan-aqooneedyada waxaa si firfircoon uga qaybqaatay xeeldheerayaal afeed ka tirsan AGA oo ay ugu muuqdeen Dr Maxamed Daahir Afrax (Muqdisho), Mustafa Fayruus (Muqdisho), Cabdiraxmaan Abtidoon (London), Saynab Daahir (London), Siciid Saalax (Minneapolis), Cabdullaahi Gacanka (Muqdisho), Maxamed Afgudhiye.(Garoowe).

Barnaamijyadan, iyo wararka MCAH, waxaa tebinayay telefishannada Somali Cable, Telefishanka Qaranka (SNTV), Universal TV, Goobjoog TV, Jubbaland TV, Kalsan TV, SBC TV iyo BBC TV; iyo idaacadaha Raadiyow Muqdisho, Raadiyow Goobjoog, VOA iyo BBC; baraha bulshada ayaa iyana muujiyay kaalin firfircoon.

# Dhallinyaro Tababbar Dhamaystay oo Shahaadooyin la Guddoonsiiyay

Xaflad lagu guddoonsiinayay shahaadooyin dhallinyarada dhamaystay tababbar-xirfadeedka qoraal-curinta toolmoon ayaa 7/1/2019 lagu qab-tay Muqdisho.

Xafladdan oo ay soo agaasintay AGA waxaa ka soo qaybgalay masuuliin ay ka mid yihiin Guddoomiyaha Aqalka Sare Md Cabdi Xaashi Guddoomiyaha AGA Dr Maxamed Daahir Afrax iyo masuuliin iyo xeeldheerayaal kale.

Tababbar-xirfadeedkan oo ka koobnaa saddex dufcadood oo socday 29/10-19/12/2018, waxaa-na ka faa`iidaystay in ka badan 120 ah dhal-linyarada hal`abuurka qalinka, oo u badnaa xub-naha naadiyada akhriska iyo qoraalka ee Hilin-Hayaan, Banaadir, Xamar, Xarunta Ifiye iyo Go-laha Maskax-Shiil iyo dhallinyaro kale oo ka tirsan saxaafadda, jaamacadaha iyo guud ahaanba bahda qoraalka.

Nasiib wanaag Akadeemiye-Goboleedka AfSoo-maaligu waxay sannadkii 2018 taabbagelisay waxqabad dhaxalgal ah, oo ay tusaale u yihiin tababbarradii taxanaha ahaa ee ay siisay dhal-linyarada akhriska iyo qoraalka, oo uu ugu dambeeyay tababarkani' ayuu yiri Dr Maxamed Daahir Afrax oo xafladda ka hadlay.

Guddoomiyaha Aqalka Sare Md Cabdi Xaashi oo isna munaasabadaas ka hadlay ayaa bogaadiyay dadaalka ay AGA ugu jirto daryeelka afka hooyo, isaga oo dhinaca kalena ammaanay dhallinyara-dii tababbarka ka faa`iidaystay.

Guddoomiyayaasha Naadiyada Hillin-hayaan, Banaadir iyo Xamar C/qaadir Jubba, Khadar Cab-di C/llaahi iyo Saciido Midnimo oo goobta ka had-lay ayaa faahfaahiyay siday ugu baahnaayeen tababar-xirfadeedkan, waxayna ka mahadceliyeen tababbbarrada ay AGA u qabato, waxayna booriyeen inay sii kordhiso.




## Tababbar-Xirfadeedka Qoraal-Curinta Toolmoon oo lagu Qabtay Kismaayo

Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga, oo kaashanaysa Madasha Maan-kulan, ayaa Tababbar xirfadeed Qoraal-curinta Toolmoon ku qabatay 11/2/2019 magaalada Kismaayo.

Tababbarkan waxaa furay wasiirka madaxtooyada Jubbaland Md Xirsi Gaanni iyo Guddoomiyaha Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga Dr. Maxamed Daahir Afrax, waxaana ka faa`iidaystay dhallnyrada hal-abuurka qalinka, macallimiin iyo ardayda wax ka barta jaamacaddaha. "Hadafka Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaligu waa sidii loo heli lahaa qalinlay reeba qoraal dhaxalgal noqda" ayuu yiri Dr Maxamed Daahir Afrax.

Guddoomiyaha Madasha Maan-kulan, Mukhtaar Rayxaani, ayaa uga dambayntii u mahadceliyay Akadeemiye-Goboleedka, waxaana uu ka mahadnaqay tababbarka ay siiyeen dhallinyarada.

Tababbarradu waxay ka mid yihiin hawlaha mudnaanta u leh Akadeemiye-Goboleedka si loo tayeeyo adeegsiga af Soomaaliga.

## Kulan-Aqooneed AGA ku Qabatay Jaamacadda Kismaayo

Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga ayaa kulan-aqooneed socday 12-13/2/2019 ku qabatay Jaamacadda Kismaayo Kulanaqoon-eedkan oo ay ka soo qaybgaleen ardayda Jaamacadda Kismaayo ayaa lagu bixinayay duruus la xiriirta af Soomaaliga, suugaantiisa iyo sooyaalka u hiillintiisa.

Kulan-aqooneedkan waxaa furay Wasiirka madaxtooyada Jubbaland Md Xirsi Gaanni, casharradiisana waxaa bixinayay guddoomi-yaha Akadeemiye-Goboleedka Dr Maxamed Daahir Afrax. "Afka Soomaaliga waxa uu ka mid yahay astaamaha lagu garto ummadda Soomaaliyeed, ruux walba waxaa waajib ku ah inuu qeybtiisa ka qaato horumarinta afka Soomaaliga" ayuu yiri Dr Afrax.



## Sahanka Dugsiyada oo AGA ka Bilowday Kismaayo

Wafdi ka socday Akadeemiye-goboleedka AfSoomaaliga, uuna hoggaaminayey Guddoomiyaha Akadeemiyada, Dr Maxamed Daahir Afrax, ayaa booqday 12/2/2019 dug-siyo ku yaalla magaalada Kismaayo.

Booqashadani waxay qayb ka ahayd bar-naamijka "Sahanka Dugsiyada" oo AGA ugu kuurgalayso xaaladda adeegsiga af Soo-maaliga ee waxbarashada, isla markaana lagu xoojinayo wadashaqaynta ay la leeda-hay bahda waxbarashada.

Booqashada dugsiyada waxaa looga gol-leeyahay ama ay qayb ka tahay ololaha ho-rumarinta Afka Hooyo iyo hal-abuurkiisa, kaas oo ka mid ah tallaabooyinka Aka-deeyadu ku meel-marinayso hal-ku-dheggeeda ah "***Hadafkayagu waa hiilka af-ka hooyo iyo hal-abuurkiisa***".




### AGA oo Buugaag Gaarsiisay Maktabadaha Jaamacadaha

Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga ayaa nuqullo ka mid ah buugaagta ay daabacday waxay garsiisay maktabadaha qaar ka mid ah jaamacadaha dalka. Maktabadaha la gaarsi-iyay waxaa ka mid ah Jaamacadda Muqdisho, Jaamacadda Green Hope, Jaamacadda City iyo Jaamacadda Umadda Soomaaliyeed (Muqdisho); Jaamacadda PSU, Garoowe; Jaamacadda Badda Cas (Boosaaso); Jaamacadda Kismaayo (Kismaayo); iyo sidoo kale maktabadda Xarunta Maan-kulan (Kismaayo).

# WARAR KALE OO XUSID MUDAN

## Guddoomiyaha Aqalka Sare oo Bogaadiyay Dadaalka AGA

Guddoomiyaha Aqalka Sare Mudane Cabdi Xaashi Cabdullaahi ayaa ku ammaanay Akadeemiya-Goboleedka AfSoomaaliga dadaalka ay horseedka ka tahay ee loogu hiillinayo afkeenna hooyo, oo ay ka mid yihiin tababarrada lagu tayaynayo adeegsiga af Soomaaliga,gaar ahaan xirfadlayaasha ku shaqeeya af Soomaaliga ,sida macalimiinta,saxafiyiinta iyo qalinlayda soo koraysa.

"Waxaan joogay furitaanka tababbarka xirfadeedka qoraal-curinta toolmoon bishii tobnaad, maanta oo ah bisha 12aad ayaan u joognaa xiritaankiisa, intan oo arday ahna in aan kala qaybgalo shahaada siintooda aad baan ugu faraxsanahay, waxaana mahaddaa leh Akadeeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga" ayuu yiri Cabdi Xaashi oo ka hadlay xiritaanka tababbar-xirfadeedka qoraal-curinta toolmoon oo ay ka faa'idaysteen in ka badan 120 arday oo qalinley ah.




## Wasiirka Warfaafinta oo AGA ku Ammaanay Kaalinteeda u Hiillinta Afka Hooyo

Wasiirka Warfaafinta, Dhaqanka iyo Dalxiiska ee Dawladda Federaalka Soomaaliya, mudane Daahir Maxamuud Geelle, ayaa bogaadiyay dadaalka Akadeemiye-Goboleedka Af Soomaaligu ugu jirto u hiillinta afka hooyo iyo horumarinta adeegsigiisa.

Wasiirka ayaa si gaar ah u xusay dadaalka soo jireenka ah ee uu caanka ku yahay Guddoomiyaha AGA Dr Maxamed Daahir Afrax oo uu ku sifeeyay xeeldheere waayo-arag ah oo lagu 'aamini' karo masuuliyadda hay`ad cilmiyeedka ka shaqaysa af Soomaaliga iyo Hal-abuurkiisa.

Wasiirku wuxuu ballanqaaday inuu ka shaqaynayo sidii loo sii xoojin lahaa, loona joogtayn lahaa, wadashaqaynta dhow ee ka dhaxaysa Wasaaradda Warfaafinta iyo Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga.

Mudane Daahir Geelle wuxuu hadalkan ka jeediyay xafladda maalinta caalamiga ah ee afka hooyo oo lagu qabtay Muqdisho.



## Akadeemiye-Goboleedka oo la Guddoonsiiyay Shahaado Sharaf

Naadiga akhriska iyo qoraalka Banaadir, oo ka mid ah naadiyada ugu firfircoon ee ka jira Gobolka Banaadir, ayaa shahaado sharaf guddoonsiiyay Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga 22/02/2019.

Shahaado sharaftan oo lagu maamuusayay waxqabadka AGA waxaa guddoonsiiyay guddoomiyaha Naadiga Banaadir Md Khadar Cabdi Cabdillaahi, waxaana ka guddoomay Saynab Xaaji Axmed "Ugbaad" oo ka mid ah masuuliinta Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga.

Hadal kooban oo uu halkaasi ka jeediyay Guddoomiye Khadar ayaa sheegay in ay AGA shahaadadaas ku mutaystay dadaalka ay ugu jirto hiilka afka hooyo iyo taageerada ay la garab taagan tahay naadiyada akhriska iyo qoraalka, gaar ahaan dhinacyada tababbarada iyo dhiirrigelinta.

Hore ayaa Akademiye-Goboleedka AfSoomaaliga loo guddoonsiiyay shahaadooyin sharaf lagu maamuusayo dadaalkeeda hagar la'aaneed ee ay ugu jirto ilaalinta, hiilka iyo horuminta afka Soomaaliga.



## Masuul ka Tirsan Xarunta Dhaqanka Aw Jaamac oo soo Booqday AGA

Mudane Maxamed Xasan Cirro oo ka mid ah masuuliinta Xarunta dhaqanka Aw Jaamac Cumar Ciise, oo uu weheliyo mudane Rooble Axmed Iidle (Qalbi-Taajir), ayaa booqasho sharafeed 29/12/2018 ku yimid xafiiska Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga ay ku leedahay magaalada Muqdisho.

Hawlwadeennada AGA oo uu horkacayo Mustafa Fayruus ayaa wafdigan ku soo dhoweeyay xafiiska, ugana warbixiyay hawlaha Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga; halka, Maxamed Xasan Cirro uu isaguna ka warbixiyay hawlaha xaruntoodu qabato. Sidoo kale, labada dhinac waxay isla meeldhigeen sidii ay u xoojin lahaayeen iskaashiga iyo hawlaha ay wada qabanayaan Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga iyo Xarunta Aw Jaamac Cumar Ciise ee xarunteedu tahay Nayroobi, Kenya.



# KORORSO AQOONTAADA AFKA HOOYO

## Qoridda Magaca Soomaali oo uu ka Horreeyo Af

*Qore: Bare Sare Cabdalla Cumar Mansuur*

Waa su`aal meesha ku jirta inaan is weydiinno *'Sidee ku habboon in loo qoro magaca* ***Soomaali*** *oo uu ka horreeyo* ***af****?'*

Dadku waxay u qoraan qaabab kala duwan, sida: *Af Soomaaliga, Af-Soomaaliga, af-Soomaaliga, Af -soomaaliga, Afsoomaaliga, , af soomaaliga, af-soomaaliga, af Soomaaliga, iwm.*

Haddaba, sow ma habboonna in aan midayno?

Markii aan ka baaraandegay siddeedan habdhigaal ee aan kor ku xusay, waxaa iigula quman habdhigaalkan '***af Soomaaliga***'; waxaanan ku doortay dhowr sababood oo kala ah:

1) Ereyga *af* waa magac guud, oo uma baahna in xaraf weyn lagu bilaabo, laakiin ereyga '*Soomaali*' waa magac gaar, oo loo baahan yahay in xarafkiisa hore la weyneeyo.

2) Laba magac oo mid guud yahay midka kalena uu yahay magac gaar in laysku lammaaniyo caadi ma aha (afSomali/afSoomaaliyeed), oo waa in la kala qaybiyaa sida: *aqal Soomaali, far Soomaali, canjeero Soomaali*, *xeer Soomaali/xeer Soomaaliyeed, af Carabi/af Carbeed, af Jarmal* .

3) Waxaase laysku lifaaqaa marka labadu ay yihiin magac guud, sida: *afguri, xeerjajab, dayaxgacmeed*, *gaarigacmeed*; ama magac iyo fal, sida:*farbaro, afhayeen, bukaansocodeegto, duurjoogto* iwm.

Marka aan leennahay '*af****ka*** *Soomaali****ga'***, labadan magacba waxay leeyihiin qodobbo, laakiin markaan leennahay 'af Soomaali**ga**', ereyga hore (af) qodob ma raaco, ereyga labaad uun baa la raacsiin karaa qodobka (af Soomaali**ga**), markaasna, caynta qodobku waxay waafaqdaa caynta magaca hore. Haddii caynta magaca hore ay tahay lab, qodobka magaca 2aad cayntiisu waa lab, xitaa haddii magaca 2aad uu yahay dheddig; haddii midka hore uu yahay dheddigna waa la xeer. Tus.:

*Gaarigacan****ka*** *(gaari****ga*** *gacan****ta****),*

*lafdhabar****ta*** *(laf****ta*** *dhabar****ka****),*

*far Soomaali****da*** *(far****ta*** *Soomaali****ga****).*

Intaa waxaa sii dheer, xitaa falku wuxuu mar walba la jaanqaadaa magaca hore, sida: *Gaarigacan****ku*** *wuu jab****ay****.* Inkastoo ereyga labaad uu yahay magac dheddig (*gacan****ta***), haddana lama oran karo: *gaarigacan****tu*** *way jab****tay***.

Inkastoo magacyada: '*af Soomaali, af Carbeed*...' ay u dhaqmaan sida ereyadaas lammaanan, haddana in la kala saaro labada magac ayaa habboon, maadaama magaca dambe uu yahay magac gaar.

# SUUGAANTA & HAL'ABUURKA

## Allow Sahal Ammuuraha!! *(Sheeko Gaaban)*

***Qalinkii Khadar Cabdi Cabdullaahi***

Si kalsooni iyo dhiirranaan leh ayay ugu dhaqaaqday dhankii goobta loogu talo galay inay dadka kala hadasho. Mar kasta oo ay tallaabo qaaddaba daymo ilqoodh ah ayay igu soo eegaysay! Farxad iyo raynrayn ayaa i wada saaqday! waxaan ugu abaalguday dhoollacaddayn aan ku sii dhiirrigelinayay.

Markay gaadhay goobtii hadalka, si geesinnimo ku jirto ayay isha ula raacday dadkii tirada badnaa ee isugu yimid munaasabaddan boqran, waxayna bilowday hadalkeedii…

*"Waxaan salaamaya cid kasta oo ku sugan madashan kulansatay miiddii iyo labeentii bulshadeenna… waxaan ku salaamayaa salaanta Islaamka Asalaamu Calaykum Waraxmatullahi Wabarakatuh. Maanta sharaf wayn ayay ii tahay inay intan oo dadwayne ahi ay igala soo qaybgaleen farxaddayda.*

*Ugu horaynba waxaan si ballaadhan oo aan hagrasho lahayn ugu mahadcelinayaa hooyadayda sharafta leh, oo igula sugan madashan. Iyada ayaa sabab u ahayd farxadda maanta iyo guusha aan ku naalloonayo.*

*Hooyo, waxaan ahaa sebi markaa uun dunida ku soo biiray, waxaan idinku bilaabay oohin, waxaad igu soo dhowayseen dhoollacaddayn.*

*Inkasta oo aanan ku ildoogsan, Ilaahay haw naxariistee, bidhaanta aabbahay. Anigoon sannadkii koowaad ii buuxsamin ayay tii Alle u timid. Hooyo, adiga ayaa ii buuxiyay kaalintii aabbe iyo taadiiba.*

*Waxaad dhexda u xidhatay kolkoolintayda iyo koritaankayga, waxaad igu barbaarisay farxad iyo nolol wanaagsan oo dhiirrigelin ii noqday.*

*Waxbarashadayda xil dheeraad ah ayaad iska saartay, waxaad igu barbaarisay han iyo hiigsi fog.*

*Waxaa hubaal ah in aad adigu sabab u ahayd in aan soo gaadho maalintan wayn ee farxadda leh. Waxaanan maarna illoobayn dhibkii aad ila soo martay. Waad mahadsantahay hooyo."*

Waxaa is beddelay jawigii madasha, waxaa is wada taagay dadkii, waxay isku dareen sacab!!

Qadar bay aamustay, intay dhankayga soo jalleecday ayay sii wadatay hadalkeedii:

*"Hooyo, la`aantaa ma noqdeen qofkan ku hortaagan ee hambalyada farxaddeeda laysugu yimid. Adiga ayaa hooyo iyo aabboba ii noqday. Mar kastaba adiga ayaa garabkayga taagnaa. Hooyo ii kaalay oo garabkayga soo joogso."*

Mar keliya ayaan is beddelay! waxaan anoo farxad la ilmaynaya tegay agteeda una holladay inaan isku duubo… mar keliya ayaan soo hembeberay anoo fadhiya goobtaydii suuqa!!

Hortayda waxaa taagan inantaydii Ubax ee saaka dugsiga aan u diray. Waxaan ka naxay waxa xilligan iskuulkii ka keenay. Ubax dharkeedii iskuulka ayay xidhan tahay, buugtiina gacanta ayay ku sidataa, wejigeedana murugo ayaa ka muuqata. Waxaan ka gartay inay cabbaar i dul taagnayd!

Iyadoo hoosta eegaysa, ayay cod hoose ku tiri: "Hooyo, iskuulka waa layga soo eryay! Waxaa la i yiri lacagtii bisha keen"!!

Waxaan is weydiiyay halkii aan ka soo amaahan lahaa lacagta dugsiga… Suuqa dhowr bakhaar ayaa dayn laygaga leeyahay… Dukaankii deriskana wejiga ma siin karo oo wuxuu igu leeyahay dayn badan.

*Allow sahal ammuuraha!!*

# Ilaasho Afkaaga Hooyo (Hees)

Heestan oo soo baxday 20/2/2019 waxaa tiriyay abwaan Salaad Cabdulle Caadle oo ku maamuusay maalinta caalamiga ah ee afka hooyo oo ku aadanayd 21/2/2019.

Waa aqal adduun
Idil nooluhu
Ka adeeg gutee.
Amintiyo waqtigu
Kuma sugo adoo
Lumiyoo inkiray
Anfacuu lahaa.
Aqoon biirta iyo
Ilbaxnimiyo garaad
Halka laga unkaa
Waa afkaaga iyo
Agabkaaga ood
Sii ilaashataa
Ummadyahay afkaa baro
Oo itaal ha ku lumin
Af kale soo ururintii,
Afka hooyadaa
Ilaashoo tixgeli.
****

Waa aqal adduun
Idil nooluhu
Ka adeeg gutee.
Oraah iyo qoraal
Eray iyo tilmaan
Lagu soo ebyaa
Ogaal biiriyee.
Aadmigu markuu
Dhashay baa Ilaah
Aqli siiyaayoo
Ididdiila iyo
Af la dhawrtayoon
Loo aayinoo
Ambadana ma jiro.
Ummadyahay afkaa baro
Oo itaal ha ku lumin
Af kale soo ururintii,
Afka hooyadaa
Ilaashoo tixgeli.
****

## Maahmaahyo

1. Rag tashaday towfiiq u dhow.
2. Hal libaax arkaysaa ma godlato.
3. Madax aadan lahayn, miyirkiisa lays ma saaro.
4. Ninna xididkii uma xoola yaraan.
5. Xoola waxaa dhaqa lixdan jir cayr ka baqaya iyo lix jir ul ka baqaya.
6. Qofkii maankaaga saluuga, maslaxaddaada ma yeelo.
7. Inani waa hooyadeed.
8. Rag haween baa is dhaafshay.

# Maalinta Caalamiga ah ee Afka Hooyo

Waxaa lagu asteeyay 21 Febraayo '*Maalinta Caalamiga ah ee Afka Hooyo'.* Laga bilaabo sannadkii 2000, inta badan waddammada adduunka waxaa ka dhaca barnaamijyo dadka lagu wacyigelinayo qiimaha uu qolo walba ugu fadhiyo afkooda hooyo.

Sidaa si la mid ah, Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaligu, ilaa markii la aasaasay 2013, iyadoo kaashanaysa bahwadaagteeda, waxay qabanqaabisaa kulan-aqooneeedyo iyo xaflado la isku baraarujinayo sida loogu baahan yahay in loo gurmado ilaalinta afka hooyo iyo horumarintiisa; taas oo ah himilada ugu weyn ee ay u taagan tahay Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaligu.

## XUSKA MAALINTA CAALAMIGA AH EE AFKA HOOYO

## 21 Febraayo 2019

## Halkudhegga 2019

***Afka hooyo waa furaha horumarinta iyo heshiisiinta bulshada***